


Toban talo oo maalka (finances) u roon

1. Maalkaaga kontarool kuhay oo gacanta kuqabo



Qor dakhligaaga iyo qarash bixintaada mustaqbalka. marka aad sidan samaysid waxa aad siwanaagsan u koontarooli kartaa halka aad lacagtaada ku bixinaysid.

2. Bil kasta kayd go'an meel dhigo



Waxaa haboon inaad lacag dhinac ugu dhigto waxyaabo aadan kutalo galin oo dhici kara, koontana aad kurido.

3. Qorshee wax gadashadaada



Alaabada aad gadanaysid meel kuqoro, iskana ilaali inaad alaab iska gadato, oo aad isaga boodo.

4. Iska ilaali inaad alaabo ku qaadato dayn ama kiro kuqaadasho



Kiro kuqaadashadu waa qaali; alaabada aad kiro kuqaadato Lacagta halmar wadabixi.

5. Waligaa isbarbardhig qiimayaasha gadayaal kaladuwan



Baaritaanka qiimaha gadayaasha kala duwan lacag ayay kuu bad-baadinaysaa. Tani waxay qusaysaa alaaboyinka & adeegyada sida caymiska iyo dayn qaadashada.

6. Haddii aanu biilku saxnayn, laxariir gadaha



Laxariir cidii soodirtay haddii aad heshid biilal ama lacag lagaa rabo inaad bixisid oo aadan fahmin. Gadahuna waa inuu cadayn qoran keenaa inaad sheegashadu sax tahay.

7. Bixi biilasha waqtiga larabo.



Waxba kuma fadhido inaad biilasha waqtigii loogu talo galay bixiso. Biilasha aan labixin waxaa loogudbiyaa dayn-soociliyeyaal, waxayna kugu noqonaysaa mid qaali ah.

8. Haddii aad bixin waydid, waxay wax udhimaysaa inaad wax daymato mustaqbalka.



Haddii biilasha loogudbiyo deyn-soociliyeyaal, waxay saamayn kuyeelanaysaa daymashadaada danbe; taas oo micnaheedu yahay in aan dayn, caymis ama layn telefoon lagu diido.

9. Haddii ay dhibaato kaa haysato bixinta, sidhaqso ah ulaxariir dayn bixiyaha



deyn-soociliyeyaaasha iyo dayn bixiyehuba waxay kaa caawin karaan inaad lacagta aayar- aayar ubixisid. Aad ayay kuugu wanaagsan tahay inaad muujisid inaad diyaar utahay inaa bixisid.

10. Haddii ay bixinta dhibi weyn kaa haysato, laxariir awoodda dowladeed ee kuudhow inay kaalataliso daynta.



Dowladda hoose ee halka aad kunooshahay, waxay bixisaa talooyin bilaash ah, si lagaaga caawiyo hagaajinta maalkaaga.